Dugsiyada Dadweynaha ee Buffalo

Sahanka Barnaamijyada Federaalka uu Maalgeliyo

Maadaama aad tahay Daneeye qiima leh, waxaanu ku weydiisaneynaa inaad buuxisid 10 su'aalood oo tilmaamaya miisaaniyadda iyo barnaamijaynta dadaalada federaalka ay maalgeliso sanad dugsiyeedka 2022-2023.

Dugsiyada Dadweynaha Degmada Buffalo waxay deeqo maalgelin badan ka heshaa barnaamijka federaalka. Sahankan ayaa diiradda lagu saari doonaa kuwa soo socda:

- **Title I** – Taageerida Ardaydeena ugu baahida badan iyo Qoysaska
- **Title IIA** – Taageerida Macallimiin tayo sare leh & Maamuliyaal iyo Horumarinta Xirfadaha
- **Title III** – Taageerida Bartayaasha Luuqadda Ingiriisiga iyo Ardayda Soo galootiga ah
- **Title IV** – Taageerida Ardayga & Kobcinta Tacliinta.

Sahanku wuxuu si gooni gooni ah diiradda u saari doona mowduucyada soo socda:

- Dadaalada waxbarista
- Ardayda in ay helaan Teknolojiyada
- Ku taageeridda Ardayda Xag Bulsho/Shucuureed
- Taageeridda Ardadeena ugu baahida badan
- Taageeridda Ardayda Soo Galootiga iyo Bartayaasha Luuqadda Ingiriiska
- Taageeridda Waalidiinta iyo Qoysaska
- Dadaalada Horumariinta Xirfadda Shaqada

1. Waa maxay Kooxda/kooxaxa Daneeyeyaasha ee sida ugu fiican kuu tilmaamaya adiga? (Dooro dhammaan kuwa ku quseeya)

    - Deggan Magaalada Buffalo
    - Arday Dugsiyada Dadweynaha Buffalo ka tirsan
    - Shaqaalaha taageerada Dugsiyada Dadweynaha Buffalo (tusaale, xubin ka tirsan PCTEA)
    - Macallin/Lataliyaha-hagaha/Shaqaale Bulsho oo ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Buffalo (tusaale xubin ka tirsan BTF)
    - Caawiye Macallin/Kaalkaaliye Macallin ka ah Dugsi Dadweyne ee Buffalo (tusaale xubin ka tirsan BEST)
    - Xubin ka tirsan Guddiga Waxbarashada (tusaale: Guddoomiyaha Guddiga Dugsiga)
    - Maamule Dugsi Dadweyne Buffalo (tusaale, xubin ka tirsan BCSA)
    - Xubin/wakiil ka tirsan Hay'ad ku saleysan Bulshada
    - Ka tirsan xubin guri loogu hadlo luuqad aanan ahayn Ingiriis
    - Waalidka/Mas'uul arday dhigta Dugsi Dadweyne Buffalo oo (Title I) leh (tusaale, dugsi kasta marka laga reebo 50, 64, 195)
    - Waalidka/Mas'uul arday dhigta Dugsi Dadweyne Buffalo aanan lahayn (Title I) (tusaale, dugsiyada 50, 64, 195)
    - Wakiilka Tacliinta Sare (tusaale, Barre/Cilmibaare ka ah Jaamacadda Buffalo)
    - Muwaadin Walaacsan
    - Kuwo kale (fadlan sharaxaad ka bixi) _____

Hoos waxaa ku qoran qaar <u>suurtagal</u> ah ee Title I/Title IIA/Title III/Title IV ee Qorshaha dadaallada Degmada ee loogu tala galay sanad dugsiyeedka 2022-2023. Fadlan sheeg mid ka mid ah dadaalada suurtogalka ah ee aad taageerto.

Fadlan dooro dhammaan kuwa khuseeya.

2. <u>*Dadaalada Waxbarista*</u>*: (Ilaha maalgelinta ee suurtogalka ah waxaa ka mid ah Title I, Title IIA, Title III & Title IV)*
    - U Soo iibinta ardayda dhibban barnaamijyo dheeraad ah ee wax ka qabashada akhriska iyo xisaabta
    - Macallimiin ka taageera akhriska iyo xisaabta oo si toos ah ula shaqeeyaan ardayda.
    - In la siiyo fursado waxbarasho oo dheeraad ah oo ka baxsan fasalka ardayda dhibban (tusaale ahaan, barnaamijyada xagaaga, barnaamijyada dugsiga ka dib, barnaamijyada Sabtida).
    - Kordhinta tirada barnaamijyada dardargelinta iyo Meeleynta Sare (Advanced Placement AP) bixinta koorsooyinka iyo dadaalada lagu ballaarinaayo in ardayda fursad u yeeshaan ka qaybqaadashada Koorsooyinka Meeleynta Sare (AP)
    - In la sii wado fursudaha dhowaan la ballaariyey ee ardayda fasalada dhexe iyo sare in ay ka qaybqaataan sameynta farshaxanka (tusaale, riwaayadaha iyo muusiga)
    - In la ballaariyo fursudaha ardayda kaga qaybqaataan qalabka muusiga.
    - Kor u qaadida taageerooyinka xagga dhaqan iyo luuqad ahaaneed ee ka turjumaya (CLRI).
    - Midkoodna ma aha kuwa kor ku xusan
    - Wax kale _____
3. <u>Ardayga inuu helo teknolojiyada</u>: *(Ilaha suurtagalka ah ee maalgelinta waxaa ka mid ah Title I, Title IIA & Title IV)*
    - Iibsasho barnaamijyo kombiyuutar oo dheeri ah iyo barnaamijyo waxbarasho oo ku saleysan webka.
    - Ku tababar macallimiin cusub farsamada fasalk barashada fog
    - Shaqaaleysiin Tababarayaal Teknoolajiyadeed oo dheeraad ah si ay uga caawiyaan macallimiinta barnaamijyada cusub ee waxbarashada.
    - Midkoodna ma aha kuwa kore
    - Wax kale _____

4. Taareerada ardayga ee Xag Bulsho/Shucuureed**:** ***(****Ilaha suurtagalka ah ee xag maaliyadeed waxaa ka mid ah Title I, Title IIA iyo Title IV)*

    - Tababarid shaqaalaha dugsiga si ay si fiican u aqoonsadaan ardayda la kulma dhibaatooyin xag bulsho/ ciriiriga xagga shucuurta iyo suurtagalnimada kuwa la tacaala caafimaadka maskaxda, si loogu gudbin karo la-taliye/shaqaale arrimaha bulshada.
    - In la siiyo tababaro iyo taageero joogto ah ee xag shucuur-bulsho iyo kartida fayoqabka.
    - In la siiyo taageero ardayda hoy la'aanta ah, kuwa laga hakiyey iskuulka iyo / ama kuwa uurka leh iyo / ama kuwa waalidnimada ku jjira iyo caruurtooda.
    - Ardayda iyo qoysaska in la siiyo ilo kheyraad ee ka hortagga is-dilidda iyo xad gudubka mukhaadaraadka.
    - Bixinta barnaamijyo looga hortago xoogsheegashada, tababarro, iyo habab hagaagsan oo looga warbixinayo xoogsheegashada (oo ay kujirto boocboocsiga onlayinka).
    - Taageero tababarid dhismayaasha dugsiyada si loo kor loogu qaado heerar nidaam taakulayn ee taageerada habdhaqanka suuban, istiraatijiyadda fayoqabka xag bulsheed/shucuureed iyo imaanshaha ardayda.
    - Midkoodna ma aha kuwo kore
    - Kuwo kale _____

5. Taageerida Ardaydeena Ugu Baahida badan: *(Ilaha macquulka ah ee xag maaliyadeed waa Title I iyo Title IV)*

    - Ilaalinta shaqaalaha taga xarumaha dadka hoy la'aanta ah si ay u siyaan waalidiinta macluumaad ku saabsan meelaha ay taageerada ka heli karaan.
    - Siinta ilaha ardayda iyo qoysaska oo u baahan in ay helaan ilo xagga caafimaadka oo hagaagsan, oo ka mid ah wacyogelinta ardayda iyo waalidiinta arrimaha ku saabsan caafimaadka iyo fayoqabka.

      Soo Iibinta qalabka Iskuulka iyo dharka yunifoomka ee caruurta guryo la'aanta ah.
    - Taageeridda ardayda xabsiyada ku xiran si ay u sii wadan karaan waxbarashadooda dugsiga sare iyo inay u diyaargaroobaan koolejka marka la sii daayo.
    - Midna ma aha kuwa kore
    - Wax kale _____

6. Taageerada Ardayda Soo Galootiga iyo Bartayaasha Af Ingiriiska: (*Ilaha maaliyadeed ee suurtagalka waxaa ka mid ah Title I, Title IIA iyo Title III*)

    - U diyaarinta qalab gaar ah, barnaamijyo iyo taageerooyin si wax looga qabto baahiyaha gaarka ah ee ardayda iyo qoysaska kuwaas oo Ingiriiska u yahay luuqad cusub
    - U diyaarinta qalab gaar ah, barnaamijyo iyo taageerooyin si wax looga qabto baahiyaha gaarka ah ee ardayda iyo qoysaska ku hadla labada luuqadood (bilingual)
    - Siinta tababarka macalimiinta, maamulayaasha, caawiyeyaasha macalimiinta iyo kalkaaliyeyaasha macallimiinta ee ku hawlan taageerada baahida Bartayaasha Luuqadda Ingiriisiga.
    - Bixinta qalab tarjumaada & aqab (tusaale; Qalabka dhageysiga Turjumaada/ Softawadhka) si loo ogolaado xiriir isgaarsiin hagaagsan ee ka dhexeeya shaqaalaha dugsiga iyo qoysaska, aqab daabacan oo ku qoran luqadaha hooyo, qaamuus erey-bixin oo loogu tala galay arday kasta oo dhowaan yimid, iwm.)
    - Midna ma aha kuwa kore
    - Wax kale _____

7. Taageerida Waalidiinta iyo Qoysaska**:** *(Title I waa mid ka mid ah ilaha dhaqaale ee suutagalka ah)*
    - Kordhinta fursadaha ka qaybgelinta waalidiinta iyo nolosha waxbarashada carruurtooda.
    - Sii wadidda ilaha khayraadka waalidiinta loo heli karo iyo munaasabadaha ka dhaca dugsi kasta
    - Sii wadidda barnaamijka Xiriirinta Waalidka Dugsiyada Title I
    - Midna ma aha kuwa kore
    - Wax kale _____

8. Hindisaha Horumarinta Xirfadeed*: (Ilaha suurtagalka ah ee maalgelinta waxaa ka mid ah Cinwaanada Title I, Title IIA, Title III & Title IV)*
    - In lagu tababaro shaqaalaha Jiilka xiga iyo heerarka kale ee waxbarashada NYSED (tusaale, xisaabta, Ingiriisiga, sayniska, cilmiga bulshada, iwm.)
    - Ku tababaridda shaqaalaha istaraatiijiyadaha barashada fog iyo barnaamijyada barashada onlayinka (tusaale, Schoology)
    - In la siiyo barnaamijyo waano ah macallimiinta cusub iyo maamulayaasha dugsiyada.
    - In la siiyo barasho aqooneed oo ku dhex milan shaqada iyo tababarayaasha waxbarista iyo taageeridda macallimiinta.
    - In la siiyo tababar horumarin xirfadeed macallimiinta akhris-qorista iyo xisaabta.
    - Siinta horumarinta xirfadeed ee macalimiinta xeeladaha waxbarida si ay u taageeraan waxbarashada ardayga.
    - In la siiyo tababar horumarin xirfadeed macallimiinta Af Ingiriisiga sida Luuqad Cusub (ENL) iyo kuwa waxbarashada gaarka ah.
    - In la siiyo tababar horumarin xirfadeed maamuliyaasha.
    - Macallimiinta iyo maamulayaasha in lagu tababaro farsamooyinka iskuulka iyo jawi fasal togan (tusaale, beddelka ka hakinta iskuulka, dhaqamada soo celinta, waxbarista dhaqan & luuqad ahaan ka turjumaysa, farsamooyinka maaraynta firfircoon ee fasalka, barashada shucuurta bulshada, eexda qarsoon, daryeelka xog-waranka khibrad dhaawac 'trauma informed care' iwm.)
    - In la siiyo tababar iyo taageero macallimiinta iyadoo la adeegsanayo xogta qiimeynta si loogu qoondeeyo waxbaris shaqsi shaqsi ahaneed oo ku salaysan baahida ardayda.
    - Midkoodna ma aha kuwa kore
    - Wax kale _____

9. Haddii aad taageerto hal ama wax ka badan oo Dadaalada Degmada ah oo aan ku qorneyn sahanka, fadlan fikradahaaga halkan ku wadaag _____.

10. Beddelka shirarka guud ee dadweynaha, jadwalka shirarka taxanaha onlayinka ayaa la qorsheeyay bilaha Luulyo iyo Agoosto si loogu oggolaado talooyin dheeraad ah oo ay ka imanaya daneeyayaasha iyo ka qaybqaadashada horumarinta Codsiga Midaysan ee Degmada (District's Consolidated Application) ee Maalgelinta Federaalka. Macluumaadka kulanka waxaa laga heli doonaa websaydhka degmada oo ah www.buffaloschools.org. iyo iyada oo loo sii marayo bogga Facebook ee Xarumaha Waalidka ee BPS. Waxa kale oo lagu wadaagi doonaa iimayl ahaan iyo ogeysiisyada qoraallada (text alerts) kuwa is-diiwaangeliyey.

Taxanaha Kulanka Codsiga Midaysan oo loogu talagalay Maalgelinta Waxbarashada Federaalka 2022-2023

Telaado, Luulyo 12, 5:30 galabnimo – Title I & Title IIA

- Waxaanu wadaagi doonaa qorshooyinkeena qabyada qoraalka ah waxaanan ku waydiin doonaa taladaada horumarinta miisaaniyadaha meelahan:
    - Taageerada Waxbarasho dheeraad ah (tusaale faragelinta akhriska/xisaabta)
    - Ka qayb-qaadashada Waalidka
    - Horumarinta Xirfadeedka shaqada

Telaado, Luulyo 19, 5:30galabnimo – Title III & Title IV

- Waxaanu wadaagi doonaa qorshooyinkeena qabyada qoraalka ah waxaanan ku waydiin doonaa taladaada horumarinta miisaaniyadaha meelahan
    - Waxbarashada Luuqadaha badan
    - Kobcinta tacliinta
    - Meelaynta Hormarsan
    - Muuqaalka & Jilitaanka Farshaxanka
    - Taageerada Xag Bulsh iyo Shucuureed
    - Farsamada wax-barida

Talaado, Agoosto 23-keeda, 5:30 galabnimo -- Miisaaniyadaha Barnaamijka Federaalka

- Anaga oo adeegsanayna jawaab celintaada shirarkii Luulyo, waxaan dib u eegi doonaa miisaaniyadaha:
    - Title I
    - Title IIA
    - Title III
    - Title IV

Fadlan dooro hal ka mid ah kuwan soo socda:

- Aad ayaan u xiiseynayaa, waxaanan qorsheynayaa inaan kaqeybgalo ugu yaraan hal kamid ah kulamada khadka onlayinka ah
- Aad ayaan u xiiseynayaa, laakiin ma haysto qalabka tiknoolajiyad loo baahan yahay inaan ku daawado seminaarka onlayinka (webinar).
- Aad ayaan u xiisaynayaa laakiin waxaan u baahanahay turjubaan si aan uga qaybgalo (ku qeex luuqada Meesha bannaan ee “mid kale” ee hoose)
- Anigu ma xiisaynaayo inaan daawado seminaarka onlayinka (webinar) laakiin waad ku mahadsan tahay qabashadiisa
- Mid kale _____